

Saajin Baadhe Shaf Rehman
Snig Hill Police Station,
Sheffield,
S3 8LY



May 2015

Gacaliye Codsade

Waxaan halkan kuugu soo gudbinayaa akhbaar ku saabsan dablayaasha gaarka ee Booliska South Yorkshire la shaqeeya. Dablayaashan gaarka ahi waxay ka ciyaaraan door muhiim ilaalinta buslshada aanu u adeegno. Askartan dablayaashu waa askar Bilays ah oo iskaa wax u qabso ku shaqeeya laakiin leh awoodaha ay leeyihiin saaxiibadooda askarta joogtada ahi. Dablayaashan iyo saraakiisha joogtada ahi waxay isaga barbar shaqeeyaan si isku duubni ah, waxayna leeyihiin awood ciidan oo ay ku fulin karaan shaqo dheeraad ah oo tayo leh. Waxaa imminka tirada ciidankan gaarka ahi gaadhaysaa 440 dable, waxaana aan doonaynaa inaan kordhino tiradan.

Shaqaalayntii ugu dambaysay ee ciidanka joogtada ah, waxaan shaqaalaynay dad badan oo hore ugu shaqaynayey ciidanka oo ay ku jiraan dablayaasha gaarka ahi. Wax badan oo dadka aanu shaqaalaynaa waxay yihiin dablayaasha gaarka. Waxaan kale oo ognahay xirfadda iyo waayo aragnimada ay korodhsadaan dablayaashanu inay wax wayn ka tarayso qaybo badan oo noloshooda ka mid ah, shaqadan tabarucaadka ahi waxay u fududaynaysaa dablayaasha gaarka ah sidii ay shaqo rasmi ah u heli lahaayeen..

Booliiska South Yorkshire waxaa yoolbaadhkoodu yahay in shaqaalohoodu noqdaan kuwa ay iska arki karaan bulshadeena qaybaheeda kala duwan. Taas macnaheedu waxa weeye sidii loo kordhin lahaa tirada askarta ka soo jeeda dadka laga tirada badan. Waxaan doonaynaa inaan soo jiidano dad tayo leh, ayna noqdaan kuwa ka soo kala jeeda bulshadeena qaybeheeda kala duwan, si bulshada oo dhammi ugu kalsoonaato shaqada boolisku hayo. Sidan waxaan u yeelaynaa si aan kor ugu qaadno adeegyada aan bulshada u fidino. Waxaan soo bandhignay qorshe loogu samaynayo saaxiib shaqaalaha la qaadanayo kaasoo ah sarkaal ama mid ka mid ah shaqaalaha dadka laga tiro badan yahay, kaasoo siinaya talo iyo caawimaad ay ku jirto la buuxinta araajida shaqada iyo siyaabaha shaqada lagu helo. Saaxiibkan gaarka ah waxaa lagala soo xidhiidhi karaa SCBuddies@southyorks.pnn.police.uk.

Dablaha gaarka ahi wuxuu u furan yahay ragga iyo dumarka da'doodu ka wayn tahay 18 jir, kuwaasoo haysta dhalashda Yurub ama sharci ay dalkan UK ku joogaan oo rasmi ah. Dablayaasha gaarka ahi waa in aan lagu lahayn dayn keeni karta inuu kaco ama maxkamadi sugayn. Sida qaaliibka dadka gala dembiyada khatarta ah looma ogola inay noqdaan dable gaar ah laakiin waa la eegayaa xaaladah gaarka ee ay ku sugan yihiin.

Waxaanu si wayn u maal gelinaa tababarida shaqaalaha cusub. Waxaan ognahay wixii saraakiishayadu bartaan inuu faa'iido keenayo adeegooduna kor u qaadmayo. Tababarka ugu horeeyaa waa saddex iyo toban asbuuc waxaana la sameeyaa galbihii iyo maalmaha sabtida iyo axadda. Tababar dheeraad ah ayaa ka dibna la gelayaa, waxaana laga barbar shaqaynayaa saraakiisha khibrada leh ee shaqada ku jirta. Tababarka la siinayaa wuxuu isugu jiri doonaa waxdhigid toos ah iyo khibrad sida loo shaqeeyo ah. Cidna lama gelinayo xaalad aanay diyaar u ahayn. Waxaa laga doonayaa dablayaasha gaarka ahi inay shaqeeyaan ugu yaraan lix iyo toban saacadood. In badan oo ka mid ah saacadahaasi kuma filna, waxayna ka hawl galaan meelaha kala duwan ee aan ka shaqayno sida garoomada kubbadda cagta, ka hawlka xaafadaha dhexdooda, ka qayb qabashada soo qabashada dembiilayaasha khatarta ah

Haddii aad doonayso inaad noqoto dable gaar ah ama doonayso inaad wax badan ka ogaato, waxaan kugu dhiiri gelinayaa in aad eegto web-site www.southyorks.police.uk Waxaad ka helayaa akhbaar dheeraad iyo bandhigyo taxane ah waxaadna la kulmi kartaa saraakiisha ku sugan xarumaha ciidamada ee kala duwan. **Foomamka codsiga waxaa iminka si toos ah loogu buuxiyaa internetka**

Waxaan sugnaaba waa codsigaaga!

Mahadsanid

The person dealing with this correspondence is:
Shaf Rehman DS 2295 Tel: 01142 963938
e-mail: shafiq.rehman@southyorks.pnn.police.uk

Shaf Rehman,
Detective Sergeant 2295.



Have you got what it takes to be a Special Constable?

Communication and respect are just some of the things that our Special Constables say it takes to do their job.

Special Constables are volunteers who have the same powers as regular police officers.

We are keen to increase our Special Constabulary even further and we welcome applications from a wide variety of backgrounds

and age groups, to reflect the diverse communities we serve.

If you're interested in learning new skills, representing South Yorkshire communities and making a difference to local people as a Special, please call **0114 219 7000** or visit **southyorks.police.uk/specials**

  **#whatittakes**



South Yorkshire

POLICE

The person dealing with this correspondence is:
Shaf Rehman DS 2295 Tel: 01142 963938
e-mail: shafiq.rehman@southyorks.pnn.police.uk